

WAA MAXAY XUQUUQDEYDU?

Waxaad xaq u leedahay inaad ogaatid wuxuu yahay macluumaadka caafimaadka ee lagaa hayo iyo waxa loo isticmaalayo.

Waxaad weydiisan kartaa inaad aragto diiwaannada caafimaadkaaga oo aad codsan kartaa isbedelo haddii ay khaldan yihiiin. Waxaad sidoo kale codsan kartaa in loo diro diiwaanadaada caafimaadka adeeg bixiye caafimaad oo kale. Haddii codsiyadaan la diido, waxaad u baahan tahay sharaxaad qoraal ah.



Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad ugu buuxisid foomka cabashada online, booqo hcc.vic.gov.au

Wac **1300 582 113** inta u dhaxeysa 9 subaxnimo iyo 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si aad uga hadashid cabashadaada.



DIIWAANKEYGA CAAFIMAADKA XUQUUQDEYDA

Somali | Soomaali



YAA HAYA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKEYGA?

adeeg caafimaad bixiyayaasha sida isbitaalada iyo dhakhaatiirta ilkaha iyo sidoo kale adeeg bixiyayaasha aan caafimaadka ahayn sida dugsiyada, caymisyada iyo wakaaladaha dawlada dhammaantood waxay ururiyaan macluumaadka caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inay hayaan taariikhdaada caafimaad, natijjooyinka baaritaanka, shahaadooyinka fasaxa jirada, liisaska daawooyinka iyo wax ka badan. Haddii ay sameeyaan diiwaanka, iyagaa iska leh.

WAA MAXAY WAAJIBAADKOODU?

Macluumaadka caafimaadka waa in lagu ururiyaa ka raali ahaanshahaaga oo loo isticmaalaa oo kaliya ujeedooyinka loo ururiyey. Si ay ugu isticmaalaan ujeedooyin aan la xiriirin, waxay u baahan yihiin ogolaanshaaga.

macluumaadkoodu waa inuu ahaadaa mid sax ah, cusub oo khuseeya shaqada ay u qaadayaan. waa inay u keydiyan, wareejiyaan oo u bixiyaan macluumaadka si ammaan ah si ay u ilaaliyan arimahaaga gaarka ah. haddii adeeg bixiyahaagu uu ka guuro gobta ama la xiro, waa inay ogeysiis dadweyne soo dhejiyan.

SIDEE BAAN KU HELI KARAA DIIWAANADEYDA?

tallaabada ugu horeysa waa inaad la xiriirtaa kuwa haya diiwaanadaada caafimaadka. Haddii aadan ku qancin jawaabtooda, waxaad sameyn kartaa cabasho.

Heath Complaints Commissioner (guddoomiyaha Cabashooyinka Caafimaadka) wuxuu maareeyaa cabashooyinka ku saabsan adeegbixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo urukii kasta ee gaar ah ee ku haya macluumaad caafimaad Victoria.

cabashooyinka ku saabsan maareynta diiwaanada caafimaadka ee ururada dadweynaha waxaad u aadaa Guddoomiyaha Xoriyada Macluumaadka.

Xafiiskeenu wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho ama saxdo diiwaankaaga, sharaxaad lagu siiyo, raali gelin iyo lacag celin ama xitaa inuu adeegu bedelo siduu u maareeyo macluumaadka caafimaadka.

Adeeggeenu waa bilaash, oo qarsoon oo dhedhexaad ah.

Nala soo xiriir

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad ugu buuxisid foomka cabashada online, booqo hcc.vic.gov.au

Wac **1300 582 113** inta u dhaxeysa 9 subaxnimo iyo 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si aad uga hadashid cabashadaada.

Na soo booqo ama noogu soo qor warqad Level 26, 570 Bourke Street, Melbourne Victoria 3000



Dhagoole, maqalku ku adag yahay ama hadalka wax ka qaba? relayservice.gov.au



Turjumaan ma u baahan tahay?
TIS National: **131 450**